## SUURAT GHAAFIR:

***Magaca Eebe yaan ku bilaabaynaa ee Naxariis guud iyo mid gaaraba Naxariista.***

1. ***Ha, Meem "aad baa Macnaheeda looga hadlay, waxaa la sheegay inay magaca suuradda tahay, ama ay ku tusin Mucjisadda Qur'anka, Eebe unbaa ogna waa la dhahaa."***

2. ***Soo dajinta Kitaabka (quraanka) waxay ka ahaatay Eebaha adkaada ee wax walba og.***

3. ***Ee dhaafa danbiga aqbalana toobadda, ayna darantahay ciqaabtiisu, ee nicmada badanleh, Eebe aan ilaahay ahayna ma jiro, xaggiisaana loo noqon.***

4. ***Kuma doodo aayaadka Eebe kuwa gaaloobey mooyee, ee yeyna kugu dhagrin gagadoonkooda adduunka.***

5. ***Waxaa beeniyay hortood qoomkii (Nabi) Nuux iyo xisbiyadii ka dambeeyey, waxayna doontay ummad kastaa rasuulkoodii inay qabato (oy dilaan) waxayna ku doodeen baadil (xumaan) inay xaqa ku tirtiraan, markaasaan qabtay ee waa sidee ciqaabteydii.***

6. ***Saasayna ugu sugnaatay kalimadii Eebe (ciqaabtiisu) kuwii gaaloobay, waana inay yihiin naarta ehelkeeda.***

***Sharaxda Suurrada ( 1 )***

Quraanka Eebaa soo dajiyey, waana adkaade wax walba oge, dambi dhaafe, toobad aqbale, ciqaab darane, iyo khayr badane, xagiisa loo noqon, quraanka oo la beeniyana oo si xun loogu doodo waa caadada gaalada, addunka oo lagu hormarana kuma tusiso jeclaansho Eebe, ee ha ku kadsoomin socsocadka gaalada (xaqdiidayaasha) Gaalana waa isku fikrad laga soo bilaabo Nabi Nuux waxayna dooni inay dilaan Nabiyada iyo dadka wanaagga fari, xaqana xumaan ku qariyaan waxaase daran ciqaabta Eebe uu ku abaal marin naar ruuxii xaqa ku qariya xumaan, Eebe iyo Rasuulkiisuna waa ka bari.

7. ***Kuwa (Malaa'igta) xambaarsan carshiga iyo kuwa gaararakiisa ah***

*Waxay ku tasbiixsan kuna Mahadin Eebehood wayna rumeysanyihiin, waxayna u dambi dhaaf warsan kuwa rumeeyey iyagoo dhihi Eebahanow waxaad ugu waasac noqon wax kasta naxariis iyo ogaanshee u dambidhaaf kuwa toobadkeena ee raaca jidkaaga kana dhawr cadaabka jaxiimo.*

8. ***Eebow gali kuwaas jannada cadni ee ah taad u yaboohday iyaga iyo ruuxii suubanaada oo ah Aabayaalkood, Haweenkooda iyo Caruurtooda, adigaa ah adkaade falsane.***

9. ***Kana dhawr xumaanta (Ciqaabta) ruuxaad ka dhawrto xumaanta maalintaas waad u naxariisatay taasina waa liibaanta wayn.***

***Sharaxda Suurrada ( 2 )***

Iimaanku waa wax wayn oo qiimo badan maxaa yeele Malaa'igta Eebe ee xambaarsan Carshiga iyo kuwa gaarar jooga waxay u ducayn una dambi dhaaf warsan Mu'miniinta jidka Eebe ku toosan iyo ehelkooda, iyagoo warsan Eebe inuu janno galiyo ciqaabna ka dhawro, taasna waxay ku tusin qaraabo nimada ugu fiican inay tahay tan iimaanka ee isku xidhay cirka iyo dhulka, wuxuuna ka sarreeyaa wax kastoo wax isku xidha, saasaana looga baahan yahay mu'miniinta inay isu jeclaadaan isuguna duceeyaan. Waxaana sugnaatay haduu Muslim u duceeyo walaalkiisa muslimka ah isagoo ka maqan Malaa'igtu waxay dhahdaa aamiin adna waxaa kuu sugnaatay wax la mid ah. Waxaa wariyey Muslim.

10. ***Kuwa gaaloobay waxaa loogu dhawaaqaa (qiyaamada) cadhada Eebaa ka wayn cadhadaad naftiina ucadhootaan, waxaayeelay waxaa laydiinku yeedhi Jiray Iimaanka markaasaad gaaloobayseen.***

11. ***Waxay dhihi Eebow waxaad na dishay laba jeer waxaadna na noolaysay laba jeer waana qiranay dambiganagii ee ma suuroowdaa jid naarta looga baxo.***

12. ***Arrintaa waxaa ugu wacan in marka loo yeedho Eebe kaliya aad gaaloowdaan, haddii wax lala wadaajiyana aad rumeysaan xukunka dhamaantiina Eebaa iska leh ee sarreeya waynna.***

13. ***Eebe waa kan idin tusiya aayaadkiisa idiinkana soodajiya Samada***

*Rizqi (Roob) mana xusuusto ruux Eebe unoqon mooyee.*

14. *Ee bari (caabud) Eebe adoo ukali yeeli cibaadada haba naceen gaaladuye.*

***Sharaxda Suurrada ( 3 )***

Cadhada Eebe iyo ciqaabtiisa yaa ka wayn kana culus u cadhoonsho naf markay meel xun kuu horseedo xaqana kaa leexiso, calaacal iyo catoowna wax mataro Qiyaamada iyo dambi la qirto midna, mar hadaad adduunkii ku dhunto, mana haboona xaqna ma aha in marka Eebe kaliya la xuso la gaaloobo xaqana la diido marka wax kale lalal caabudana la rumeeyo, arintaas xukunkeedana Eebaha wayn baa maamuli ee ah kan tusiya dadka aayaadkiisa cirkana Roob uga keena, xaqna ay tahay in loo toobad keeno lana caabudo isagoo loo kali yeeli Diinta iyo cibaadada, haba naceen oo diideen gaaladuye.
Nabiguna (Naxariis iyo Nabadglyo Eebe korkiis ha yeelee) wuxuu yidhi: Barya Eebe sareeye idinkoo yaqiinsan ijaabo, ogaadana in Eebe sareeye uusan ajiibayn duco qalbi halmaansan oo shuqloon. Waxaa wariyey Ibnu Abii Xaatim.

15. *Eebe waa kan ay sarrayso darajadiisu (waxna koryeela) carshigana iska leh, kuna soo dajiya waxyigiisa (iyo jibriil) oo ah amarkiisa cidduu doono oo adoomadiisa ah, si uu uga digo maalinta kulanka (Qiyaamada).*

16. *Maalintay usoo muuqan (usoo bixi) Eebe waxba kama qarsoona korkiisa, wuxuuna dhihi Eebe yaa xukunka iska leh maanta, markaasuu dhihi Eebaha kalida ah ee awooda badan.*

17. *Maalinta (Qiyaamada) waxaa laga abaalmarin nafkastaa waxay kasbatay, dulmina majiro Maanta, Eebana wey dag dag badantahay xisaabtiisa.*

18. *Uga dig Nabiyow dadka Maalinta dhaw (Qiyaamada) markuu wadnuhu imaan dhuunta (Cabsi darteed) iyagoo naxsan daalimiinna uma sugnaan sokeeye iyo mid u shafeeco la maqlo.*

19. *Eebe waa ogyahay khayaanada indhaha iyo waxay qarin laabtu.*

*20. Eebe wuxuu xukumaa xaq, waxay caabudina oo Eebe ka sokeeya waxba ma xukumaan, Eebana waa maqle arka ah.*

***Sharaxda Suurrada ( 4 )***

Eebaa sharaf leh cidduu doonana sharrifa, waxyigiisana ku soo dajiyay addoomaduu doortay ee Nabiyada ahaa, si ay dadka ugu digaan. Xukunka adduunka iyo aakhiraba Eebaa iska leh wax ka garsoonna majiro cidna ma dulmiyo, xisaabtiisuna waa darantahay, dadkana waxaa looga digayaa maalinta qiyaame ee dhaw, illeen wixii imaanba waa dhawyahaye, waana maalin cabsi badan wadnuhuna dhuunta imaan, cidna wax isu tarayn, Eebana wax walba daalacan xaqana xukumi, waxa la caabudo ee ka soo hadhayna ayan waxba qabaneyn. Xadiith Alqudsi waxaa ku sugnaaday in Eebe yidhi: addoomadaydoow waan ka reebay dulmiga naftayda waxaana ka yeelay dhexdiinna mid reeban ee hays dulmiyina. Waxaa wariyay Muslim.

*21. Miyayna ku soconin Dhulka ooyan fiirinin siday noqotay cidhibtii kuwii ka horreeyey (Gaaladan) waxay ahaayeen kuwa ka xoogbadan kana camiraadbadan dhulka, markaasuu qabtay Eebe danbigooda dartiis umana sugnaan waxa Eebe ka soo hadhay wax daafaca.*

*22. Waxaana saas ugu wacan inay ahayd xujooyin, oy ka gaaloobeen markaas Eebe qabtay maxaa yeelay waa xoogbadane ay darantahay ciqaabtiisu.*

*23. Dhab ahaan yaan (Nabi) Muuse ugu dirray isagoo wata aayaadkannaga iyo xujo cad.*

*24. Xagga Fircoon, Haamaan iyo Qaaruun waxayna dhaheen waa sixirroow beenaala ah.*

*25. Markuu ugala yimid xaqa agtanada waxay dheheen dila wiilasha ku rumeeyey, daayana Haweenka (Gabdhaha) dhagarta gaaladuna ma aha waxaan khasaare ahayn.*

*26. Wuxuu yidhi Fircoon, i daaya aan dilo Muusee hana ujeedho Eebihiisa, waxaan ka cabsan inuu idinka badalo Diinta ama uu ka muujiyo dhulka fasaad.*

*27. Wuxuuna yidhi (Nabi) Muuse waxaan ka maqangalay Eebahay iyo Eebihiin mid kasta oo is kibriya (isla wayn) oon rumayn Maalinta xisaabta qiyaamada.*

***Sharaxda Suurrada ( 5 )***

Dhulka waa in lagu waano qaato lana eego dadkii hore deganaa iyo sida Eebe u halaagay iyagoo xoog badnaa, markey beeniyeen Rasuuladoodii Eebana si daran ayuu u ciqaabay, tan kale qisada Nabi Muuse wax badan yey quraanka ku soo aroortay, halkanna Fircoon, Haamaan iyo Qaaruun waxay beeniyeen xaqii waxayna is fareen in la laayo wiilasha kuwa rumeeyey Muuse Haweenkuna daayaan, waxay dhagreen gaalana waa uun khasaare, tan kale Fircoon wuxuu codsaday in la daayo si uu u dilo Muuse isagoo oo sheegi inuu badali diinta dhulkana fasadin, taasina waa caadada xumaan iyo shar ka taliyayasha inay wanaagga iyo dadkiisa ceebeeyaan kana dagaalamaan. Nabi Muusana wuxuu maqan galay Eebe kibir badane dhamaantiis oo beeniyey xisaabinta (Qiyaamada).

*28. Wuxuu yidhi nin Mu'min ah oo ka mid ah dadka Fircoon oo qarinaayay limaankiisa, ma waxaad udilaysaan in uu yidhi Eebahay waa Alle, isagoo idiinkala yimid xujooyin xagga Eebihiin hadduu beenaale yahayna isagay dhibi beentiisu, hadduu runle yahayna waxaa idin ku dhici wuxuu idiin ku yaboohay qaarkiis, Eebana ma hanuuniyo danbi badane been badan.*

*29. Qoomkayoow idinkaa iska leh xukunka maanta una adag dhulka, yaase nooga gargaari caddaabka Eebe hadduu inoo yimaado Fircoon wuxuu yidhi idin kula talin maayo waxaan ahayn ra'yigayga (waxa ii muuqda) idinkumana hanuuniyo waxaan ahayn waddada xaqa ah.*

*30. Wuxuu yidhi kii rumeeyey (Xaqa) qoomkayoow waxaan idiin ka cabsan sidii maalintii xisbiyadii.*

*31. Sidii Qoomkii Nabi Nuux iyo reer caad iyo thamuud iyo kuwii ka dambeeyey, Eebana ma aha mid la doona dulmi addoomada.*

*32. Qoomkayow waxaan idinka cabsan maalinta isu yeedhidda (Qiyaamada).*

*33. Maalintaad jeedsandoontaan idinkoo carari, idiinna sugnayn wax Eebe idinka ilaaliya, ruux Eebe dhumiyeyna malaha (ma jiro) wax hanuunin.*

***Sharaxda Suurrada ( 6 )***

Cid fiican oo xumaanta reebta wanaagana farta lama waayo, waxaana ka mid ah Mu'minkaas fircoon ehelkiisa ka mid ahaa, ee qariyay iimaankiisa kuna yidhi ma waxaad dileysaan nin yidhi Eebahay waa Alle oo xujooyin idiinla yimid, hadduu beenaale yahay isagay dhibi, hadduu runle yahayna waxaa idiinku dhici wuxuu sheegi qaarkiis, maantana idinkaa dhulka xukuma oo ka muuqda, haddiise dhib Eebe yimaado yaa inaga korin, fircoonse nin xunbuu ahaa wuxuuna ku yidhi qoomkiisii arrini waa taan anigu sheego oon rayiyeeyo waxaan wanaag ahayna idin tusinmaayo, laakiin ma dhabaa xumaantuu tusiyay una hogaamiyay miyaan loo halaagin sidii kuwii ka horeeyey taasna waxay ka digi xumaan wade warkiisa.

*34. Waxaa dhab ahaan idiin kula yimid xujoojin marhore (Nabi) Yuusuf, kamana aydaan tagin shaki wuxuu idiin la yimid markuu dhintayna waxaad dhahdeen ma soobixinaayo Eebe gadaashiis Rasuul, saasuuna udhumiyaa Eebe Ruux xad gudba oo shaki badan.*

*35. Kuwa kudoodaya aayaadkanaga xujo utimid la'aanteed waxaa ku waynaatay cadho Eebe agtiisa iyo kuwa rumeeyay, saasuuna u daabacaa Eebe qalbi kastoo is kibriya oo daalim ah.*

*36. Wuxuu yidhi fircoon Haamaanoow ii dhis Daar (Sare) si aan ugu gaadho wadooyinka.*

*37. Wadooyinka Samooyinka markaas aandaalacdo Ilaaha Muuse anigu waxaan u malayn beenaalee, saasaana loogu qurxiyay fircoon camalkiisa xun loogana leexiyay jidka, dhagarta fircoonna, ma aha waxaan khasaare ahayn.*

*38. Wuxuu yidhi kii rumeeyay (Xaqa) qoomkayoow i raaca waxaan idinku hanuunin jidka fiicane.*

*39. Qoomkayoow nolashan adduunyo ee dhaw waa uun raaxo (yar) aakharaase guri nagaadi ah.*

*40. Ruuxii camal xun sameeya laguma abaalmariyo wax lamid ah mooyee, Ruuxiise camal fiican fala Lab iyo Dhaddigba isagoo rumaysan kuwaasi waxay gali Jannada, waana lagu arzuqi dhexdeeda xisaab la'aan.*

***Sharaxda Suurrada ( 7 )***

Qisada Nabi Yuusuf waxay ku faahfaahsan tahay suuradda magaciisa xambaarsan, tan kale in gadaashiis Nabi la soo diri ciddii diiday waa cid dhunsan, isla wayne, dulmi badane, xaqdiide iyo xumaan ku murme dhamaantood Eebe waa u cadhoodaa iyo Mu'miniintuba, Xaqana ma arko kaasoo kale, waxaa iyana wax lala yaabo ah doqonimadii fircoon iyo isla waynidiisii intuu ka doonay in loo dhiso guri dheer oo uu dadka ku tusiyo inuu Ilaahay daydayi, taasina waa waallidiisii iyo camalkiisii xumaa ee wax badan Quraanku ka warramay. ma siman yihiin kaas iyo kan jidka fiican dadka ku toosiyay, ugana digay xumaata adduunyo, iyadoo cid walba la amaalmarin rag iyo haweenba.

*41. Qoomkayoow maxaa ugu wacan inaan idiinku yeedho korid idinna iigu yeedhaan Naar.*

*42. Iiguna yeedhaan inaan ka gaaloobo Eebe lana wadaajiyo (Cibaadada) waxaanan oqoon ulahayn, aniguna waxaan idiin ku yeedhi xagga Eebaha adkaada ee dambidhaafa.*

*43. Waxaan shaki lahayn in waxaad iigu yeedhaysaan xaggiisa uusan lahayn Nacfi (iyo wax ajiiba) adduun iyo aakhiraba, waxaana laynoo celin xagga Eebe kuwa xadgudhana iyaga uunbaa ah asaxaabta (Ehelka) naarta.*

*44. Waadna xusuusan doontaan waxaan idin kuleeyahay, waxaana u bandhigay amarkayga xagga Eebe, ileen Eebaa arkaa addoomadee.*

*45. Markaasaa Eebe ka dhawray Mu'minkaas xumaatay ku dhagreen, waxaana ku dhacay (ku dagay) Fircoon iyo ehelkiisii caddab xun.*

*46. Naarbaana loo bandhigaa aroortii iyo galabtiiba, Maalintay kacayso Saacaduna (Qiyaamada waxaa ladhidi) galiya fircoon iyo ehelkiisa kan ugu daran cadaab.*

***Sharaxda Suurrada ( 8 )***

Ninkaasu wuxuu u jeediyey Qoomkiisii hadallo iyo waano Qiimo badan, wuxuuna u sheegay inuu wanaag iyo nabadgalyo ugu yeedhi iyana Naar iyo gaalnimo aan wax khayr iyo nacfi ah lahayn iyo caabudid ilaahyo baas, wuxuuna cadeeyey in xadgudbayaal abaalkoodu yahay Naar ayna xusuusan doonaan waxa wanaagsan ee uu sheegi amarkiisuna uu Eebe u bandhigi isagoo arka addoomadiisa, Eebana waa ka nabadgaliyey dhagartii Fircoon isagana waxaa ku dagay xumaantay maleegeen, Qabriga iyo Qiyaamadana waa lagu cadaabi iyo wixii wadadooda qaada.

*47. Xusuuso waqtigay ku doodi ehelu Naarku Naarta dhexdeeda ooy ku odhan kuwii (raaciyada ahaa) kuwii (madaxda ahaa) ee isla weynaa idinkaan idin raacaynay ee wax manooga taraysaan qayb naarta ka mid ah.*

*48. waxay dheheen kuwii iskibriyey dhamaanteen waxaan ahaanaynaa naarta dhexdeeda, Eebana waa kala xukumay addoomadiisa dhexdooda.*

*49. Waxayna ku dhaheen kuwa naarta kusugan adeegaha jahannamo noo barya Eebihiin inuu naga fududeeyo maalin cadaabka.*

*50. Waxay dheheen adeegayaashii miyeyna ahayn inay idiinla timid Rasuuladii xujooyin, waxay dhaheen way noola timid, waxayna dhaheen barya idinku marka Eebe, baryada gaaladana ma aha waxaan baadi iyo khasaare ahayn.*

*51. Annagaa u gargaari Rasuuladanada iyo kuwa rumeeyey xaqa nolosha adduun iyo maalinta ay kici maragyadu.*

*52. Maalintayna anfacayn daalimiinta cudurdaarkoodu ayna u sugnaan Naclad iyo Guri xun (Naar).*

***Sharaxda Suurrada ( 9 )***

Dood iyo muran iyo calaacal ehelu-naarna wax ma taro, waxayna sheegi aayadani inay murmi madaxdii xumayd iyo shacabkii xumaanta ku raacay dhamaanna ay naarta gali , wax uga maciini cadaabkana ayna heleyn, Eebana u gargaari Rasuuladiisa iyo kuwa xaqa ku raacay, saasdarteed waa in wanaaga laysku raacaa iyo Eebe u dhawaanshaha, oonse laysku raacin layskuna taageerin gaalnimada iyo xumaanta, si aan Qiyaamada loo dullobin.

***53. Dhab ahaan yaan u siinay Nabi Muuse hanuun (Nabinimo) una dhaxalsiinayna Bani Israa'iil Kitaabka (Tawreed).***

***54. Hanuun iyo waano isagoo u ah kuwa caqliga leh.***

***55. Ee samir Nabiyow yabooha Eebe waa dhabe, dambi dhaafna waydiiso kuna tasbiixso adoo ku dheehan mahadda Eebahaa Galab iyo Aroorba.***

***56. Kuwa ku murmi aayaadka Eebe xujo la'aan u timid laabtooda ma aha waxaan kibir ayna gaadhayn ahayn, ee ka magan gala Eebe isagaa wax maqla waxna arkee.***

***57. Abuuridda cirka iyo Dhulka yaa kawayn abuuridda Dadka (sida u muuqata) laakiin Dadka badidiis ma oga.***

***58. Ma eka indhoole iyo arke iyo kuwa rumeeyey (Xaqa) camalfiicanna falay iyo xumaanloow, wax yar baadse xusuusanaysaan.***

***59. Saacadda (Qiyaame) way iman shaki la'aan laakiin Dadka badidiis ma rumeynayaan.***

***Sharaxda Suurrada ( 10 )***

Wax badan yaa qisada Nabi Muuse iyo Nabiyada kalaba lagu soo celceliyey Quraanka, si Nabigu u weheshado una xusuusto sidii loo dhibay Eebana ugu gargaaray, waxaana Eebe u dardaarmay Nabiga inuu sii badiyo cibaadada Eebe iyo ku xidhnaantiisa, kuwa ku murmi xaqa xujo la'aan waxaa qalbigooda galay isla weyni aan meel jirin, Eebahaas abuuray cirka iyo dhulka miyaa ka caajisi soo celintooda iyo wuxuu rabo inuu abuuro, ma sinna ruux hanuunsan iyo mid dhunsan, mana sinna mu'min camal falay iyo xumaanloow, mase xusuusan yihiin dadku saacaddu Qiyaame waa dhab inaan mu'min baarri ah iyo gaal xun sinnayn laakiin dadku saas ma garanayaan.

*60. Wuxuu yidhi Eebehiin i barya aan idiin ajiibee, (aqbalee) kuwa iska weyneeya cibaadadayda waxay gali doonaan naarta jahannamo iyagoo dulleysan.*

*61. Eebee waa kan idiin yeeley habeenka inaad xasiloonaantaan dhexdiisa, maalintana (ifid) arag, Eebana waa kan wax ku galladaysta dadka laakiin dadka badankiisu kuma mahdiyaan.*

*62. Kaasi waa allihiin, Eebana idiin ah wax walbana abuuro, Eebe mooyee mid kale ma jiro ee xagee xaqa laydiinka iili.*

*63. Saas ookale yaa loo iilay kuwii aayaadka Eebe diidi jiray.*

*64. Eebe waa kan idiinka yeelay Dhulka meel sugnaansho, Cirkana dhismo oo idin sawiray wanaajiyayna Suuraddiina oo idinku Arzaaqay wax wanaagsan kaasi waa Eebihiin waxaana sarreeya oo nasahan Eebaha Caalamka Eebihiisa ah.*

*65. Eebaha nool, Eebe aan isaga ahaynna ma jiro ee barya (caabudana) idinkoo u kaliyeeli Diinta, mahadna waxaa iska leh Eebaha Caalamka.*

***Sharaxda Suurrada ( 11 )***

Nabig wuxuu yidhi (Naxariis iyo Nabadgalyo Korkiisa Eebe ha yeelee):baryada waa cibaado, wuxuuna akhriyey aayaddan saasdarteed waa in uun Eebe la baryaa lana caabudaa, ciddii iska kibrisana waxay gali iyadoo duleysan Naarta, maxaa yeeley wa kan noogu nicmeeyey habeenka iyo maalintaba, wax walbana abuuray dhulkana inooga yeeley wax lagu sugnaado cirkana dhismo oo ina sawiray qurxiyayna suuradeenna wax wanaagsan oo xalaal ahna inagu arzaaqay kaasi waa Eebeheen wuxuuna inaga mudan yahay mahad, baryo, cibaado iyo Wayneyn.

*66. Waxaad dhahdaa Nabiyow waxaa layga reebay inaan caabudo waxaad baryeysaan Eebe ka sokow markay iigayimaadeen xujooyin xagga Eebahay, waxaana lay faray inaan uhogaansamo Eebaha Caalamka.*

*67. Eebe waa kan idiinka abuuray Carrada Hadana Dhibic, haddana Calaqo markaas idin soo bixiyey idinkoo ilma ah, hadana aad*

*gaadhaan xoogiina, haddana aad noqotaan Odayo waxaase idinka mid ah cid la oofsado (Dhimata) intaas ka hor, iyo inaad gaadhaan waqti magacaaban waxaad udhawdihiin inaad wax kastaan.*

*68. Eebe waa kan wax nooleeya waxna dila markuu doono inuu xukumo amarna wuxuu uun dhahaa ahaw wuuna ahaadaa.*

*69. Ka warra kuwa ku murmi aayaadka Eebe xagge looga iili xaqa.*

*70. Kuwa beeniyay Kitaabka (Quraanka) iyo waxaan la soo dirray Rasuulladanada way ogaandoonaan, cidhibtooda.*

*71. Marka Katiinado layeelo Luquntooda Silsiladdana lagu jiido.*

*72. Kulayl haddana (Naar) lagu jiido.*

*73. Markaas lagu dhaho aaway waxaad la wadaajiseen cibaadada.*

*74. Eebe ka sokoow, waxayna odhan waa naga Dhumeen (waynay), mase aanaan ahayn kuwo Wax ucaabuday horay, saasuuna Eebe udhumiyaa Gaalada.*

*75. Taasina waa waxaad ugu farxi jirteen Xumaanta dhulka dhexdiisa xaq daro iyo Waxaad la kibri jirteen.*

*76. Ee gala irdaha jahannamo idinkoo ku Waari waxaana u xun meeluu ku hoydo isla wayne Naarta Jahanamo.*

***Sharaxda Suurrada ( 12 )***

Eebe wuxuu dadka ku adkeeyay inay isaga uun caabudaan, una hogaansamaan Nabiguna waa ka fogyahay inuu u jeedsado waxaan Eebe ahayn ee waa guubaabo dadka. Awooddana Eebaa iska leh, dadkana abuuray dilina doona, ciddii xaq darro ku muranta oo kibirta oo caabudda Eebe ka sokow wax kale ama xumaan ku adeecda wuxuu galin naarta isagoo dulaysan oo xidhxidhan.

*77. Samir (adkayso) nabiyow yabooha Eebe waa xaqe, haddaanu kutusinno waxa (guusha) aannu Kuu yaboohi qaarkeed (intaad*

*nooshahay waa Wanaaga) amaan ku oofsanno (intaas Ka hor) Xaganagga loo soo celin (gaaladaas).*

*78. Waxan dirray rasuullo adiga hortaa Waxaa ka mid ah kuwo aan kaaga qisoonay iyo kuwo aanaan kaaga qisoonin, rasuulna aayad (mucjisad) ah idiin Lama imaan karo Eebe la'aantiis hadduuse yimaado amarka Eebe (cadaabkiisu) waxaa la Xukumi xaq waxaana ku khasaaray halkaas kuwa Xumaanlowga ah.*

*79. Eebe waa kan idiin yeelay Nicmoolayda (xoolaha) inaad waxna ka fuushaan waxna ka cuntaan.*

*80. Waxaana idinka sugnaaday dhexdeeda Nacfi iyo inaad ku gaadhaan danihiina Laabta idinkaga jira, korkeeda iyo doonta Ayaana la idinku xambaaraa.*

*81. Wuxuuna idin tusiyaa aayaadkiisa ee teed aayaadka Eebe diidaysaan.*

***Sharaxda Suurrada ( 13 )***

Samirka iyo adkaysigu wax badan baa quraanka lagu sheegay, Eebana wuxuu nabiga u yaboohay inuu abaal marin gaaladii xaqa diiday, ama adduun iyo Nolosha nabiga ama aakhiro, tan kale wuxuu Eebe inoo sheegay in rasuuladii uu diray qaarna ka qisooday kuwo kalana uu ka aamusay, wax mucjisad la imaan kara idan Eebe la'aantiina ma jiro, markase amarka Eebe yimaado dad waa la kala xaaqi xumaanlowna halkaasuu ku khasaaray, Eebena waa kan inoogu nicmeeyey xoolaha doonyaha iyo gaadiidka kale ee la raaco, si danaha loo gaadho. Wuxuuna ina tusiyaa aayaadkiisa mana haboona in la diido aayaadkaas, saasdarteed waa in Eebe nicmadiisa la aqoonsado laguna mahadiyo wanaagana loogu kaalmaysto.

*82. miyayna ku soconin dhulka oo ay fiiriyaan Siday noqotay cidhibtii kuwii ka horreeyay, waxay ahaayeen kuwo ka badan kana xoog badan iyo camiridda dhulka, waxna uma tarin waxay kasbadeen.*

*83. markay ula yimaadeen rasuuladoodii xujooyin waxay ku farxeen gaaladii waxa agtooda ah oo cilmi ah, waxaana ku dagay waxay ku jees-jeesi jireen (abaalkiisii).*

*84. markay arkaan cadaabkanaga waxay dhahaan waxaan rumaynay Eebe kaliya waana diidnay waxaan Eebe la wadaajin jirray.*

*85. Mana aha kuu anfici iimaankoodu markay Arkaan cadaabkanaga, waa sunnada (dariiqada) Eebe ee u horaysay adoomadiisa, waxaana ku khasaaray halkaas gaalada.*

***Sharaxda Suurrada ( 14 )***

Aayadahan waxay ka warrami in ay haboon tahay in dhulka la maro laguna waano qaato sida Eebe ku falay kuwii xooga badnaa ee dhulka camiray ee horreeyey, waxna uusan u tarin waxay kasbadeen, markay rasuuladii u yimaadeen iyagoo mucjisad watana ay diideen kuna farxeen waxay haystaan oo cilmi ah, ciqaabna markaas ku dhacday, markayse gaaladu iyo xumaanlawgu arkaan dhabta yay qayliyaan diidaana waxay caabudi jireen ama ku dhaqmi jireen, markaasoo kalase rumayn wax ma tarto waana jidka Eebe ee horreeyay, waxaana halkaas qiyaamada ku khasaari gaalo, xadiithna waxaa ku sugnaaday in (Eebe aqbalo tawbadda adoonka intaan sakaraadku u imaan), khasaaraha dhabta ahna waa kan qiyaame.